IIB MA GAIO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 7aad — Muqdisho 15 Oktoobar 1979 L. 1R 10

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 Shilin lambar waliba **RUKUNKA:** Sanadkii waa Sh. 100 Soomaaliya guduheeda — dibadeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lagagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHAHRCI

SHARCI L. 35 ee 3 Okt. 79, Sharci ku saabsan dheereyn muddo Cafis buuxa oo loo fidyay Dadka ka baxsaday Dalka Soomaaliyeed.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 47 ee 15 7 79, Habka Hirgelinta Heshiisyada Aqoonsiga Qaxootinnimada.

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 48 ee 23 8 79, Kirada Cucub ee Baabuurta Xamuulka qaada

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 49 ee 22.9.79, Soo saarid lacag dahab ah, Qalin ah, iya maar (cupron-ickel) oo loogu tala galay xuska sannad guuradii 10aad ee Kacaanka 12 Okt. 1969.

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho.

QAYBTA SEDDEXAAD
TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA G. MUDUG GAALKACYO 4.4.79, Lumid Jeeg wareega L. 206570 ku qoran Shs. 2.500 uu leeyahay Cali Nuur Xalane Kaahiye L. 494

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 29.9.79, Lumid Jeeg war. L. 015107 ku qorna Shs. 31.115 uu leeyahay Xaaji Cab/Dir Sh. Cu. L. 495

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30.9.79, lumid Buug Keyd L. 1718 ku qoran Shs. 4.000/= uu leeyaha Cabdi Muudey Maalin L. 496

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 4.10.79 Lumid Jeeg wareega L. 017063 u ku qoran Shs. 25,000,u leelyahay Xaaji Daa'uud Warsame L. 498

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 9.10.79 lumid Jeeg war. lam. 258241 ku qoran Shs. So. 10.000=/ u leeyahay Cali Xaaji Maxamed L. 499

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 11.10.79 lumid Jeega wareega lam. 172656-035157 ku qoran Shs. 50.000 Shs. 4865 u leeyahay Cabdi Xuseen Nuur L. 500/=

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 14.10.79, lumid Jeeg wareega lam. 031470 ku qoran Shs. 20.000/= u leeyahay Doolaal Faarax Axmed L. 501

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 35 ee 3 Okt. 79, Sharci ku saabsan dheereyn muddo cafis buuxa oo loo fidiyey dadka ka baxsaday Dalka Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qodobbada 82aad, 111aad iyo 113aad ee Dastuurka J.D.S.
MARKUU ARKAY: Shaciga L. 15 ee 15 Maajo 1979;

ASAGOO AQAANSADAY: In ay tahay lagama maarmaan in loo dheereeyo muddada Cafiska Dadka Sooaaliyeed ee Dalka ka baxsaday ayna u suurtoobi weyday in ay ka faa'. ideystaan mudadii hore ;

ASAGOO TIXGELIYEY: Go'aankii Guddiga Siyaaadda iyo Golaha Dhexe ee X.H.K.S.

WUXUU SOO SAARAYAA

Shrciga soo socda:-

Qodobka 1aad

Muddada ku xusan qodobka 3aad ee Sharciga 15aad ee 15 Maajo 1979 waxaa lagu kordhiyey saddex bilood lago bilaabo taariikhda sharcigan dhaqan galo.

Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa isla maalinta u saxiixo Madaxweynaha Jahuuriyadda Dimoqaraadiga Socmaaliya.

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdiho 3 Oktoobar 1979

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)
MADAXWEYNAHA J.D.S.

QAYBTA LABAAD
XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 47 ee 15 Luulyo 79, Habka Hirgelinta Heshiisyada Aqoonsiga Qaxootinnimada

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAOO ARKAY: Heshiiska 1951 iyo Borootokoolka 1967 ee ku saabsan Aqoonsiga Qaxootinnimada.

ISAGOO AQOONSAN: Inay tahay lagama maarmaan in la soo saaro habka sharciyeed iyo maamuleed ee lagu xaqiijinayo Qaxootinnimada Dalka Soomaaliyeed,

ISAGOO TIXGEI-INAYA: Talada Wasiirka Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Reer miyiga,

WUXUU SOO SAARAYAA

Qodobka 1aad

SHURUUDAHA AQOONSIGA QAXOOTINNIMADA

1. Aqoonsiga Qaxootinnimad waxaa la siin karaa Dadka arji soo qorta lehna shuruudaha ku qoran qodobka 1aad ee Heshiiska 1951, Brotokoolka 1967 iyo Heshiiska Ururka Midowga Afrika 1969 kuna saabsan Aqoonsiga Qaxootinnimada.

2. Habka Hoos ku qoran m asaameynaayo Qaxootiga faraha badan ee ay Dawladdu ku aqoonsato xaaladda gaarka ah.

Qodobka 2aad

GUDDIGA OGOLAANSHAHA QAXOOTINNIMADA

1. Waxaa la dhisayaa Guddi gaar ah oo leh awoodda siinta Qaxootinninmada, Guddigu wuxuu ka kooban yahay:-

i) Garsoore uu magacaabo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare — Guddoomiye,

ii) Qof ka wakiil ah Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda — Xubin

iii) Sarkaalka Qaxootiga ee Qaranka — Xubin

iv) Qof wakiil ka ah Wasradda Caafimaadka — Xubin

v) Qof wakiil ka ah Wasaaradda Arrimaha Dibadda — Xubin

vi) Qof ka wakiil ah Ciidanka Nabadsugedda — Xubin

2. Wakiilka Laanta Qaxootiga ee Ummadaha Midoobay ee joogga Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya goob joog ahaan ayuu fadhiyada ka qeyb geli karaa.

3. Guddiga waxaa wajib ku ah inuu araajida Qaxootiga uga Go'aan gaaro sidii ay la noqoto, isagoo raacaaya Qoddobada Heshiiska 1951 ee ku lug leh arrintaas, wuxuu kaloo go'aan ka gaarayaa lumida Aqoonsiga Qaxootinnimada.

4. Guddigu wuxuu sameynayaa habka u ku shaqeeyo.

Qodobka 3aad

RAFCAAN

1. Qof kasta oo ka cabanaya Go'aanka Guddiga wuxuu Rafcaan u qaadan karaa Guddiga Caddaaladda ee ka dhisan Madaxtooyada. Guddiga Caddaaladda wuxuu go'aan ka gaarayaa Rafcaannada ay u soo qaateen Dadka ka cabanaya Qodobada 31,32 iyo 33 Heshiiska 1951.

2. Guddiga Caddaaladda wuxuu awood u leeyahay inuu aqbalo, beddelo ama tirtiro Go'aanka Guddiga, Go,aankiisana waa mid kama dambeys ah.

Qodobka 4aad

DOKUMENEI

Marka qof loo aqoonsado Qaxooti, wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo dokumentiga lagu tilmaamay sharciga Qaranka ama kan Dawliga.

Qodobka 5aad

Xeerkan wuxuu u dhaqan gelayaa si deg deg ah waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 15 Luulyo 1979

Wasiisrka Dawladaha Hoose & Horumarinta Miyiga
S/Gaas Jaamac Maxamed Qaalib

Madaxweynaha J.D.S.
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 48 ee 23 Agoosto 79, Kirada Cusub ee Baabuurta Xamuulka Qaada.

ISAGOO ARKAY: Warqaddii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

HADDUU ARKAY: Xeerarkii tr. aheyd 240 iyo 89, taariikh 29.9.70 iyo 1.6.1967 ee ku saabsanaa Sonkorta iyo Qalabka kala duwan.

HADDUU ARKAY: Xeerarka Madaxweynaha J.D.S. ee ku saabsan Kirada cuub ee Baabuurta Xamuulka, lam. 47 iyo 10. taariikh. 8.5.1974 iyo 1da/1/78.

HADDUU KA WAR HELAY: Dhibaatooyinka Gaadiidka ka heysta xagga qiimaha kacaya muddadii Xeerarkii hore ee xaddidaayey qiimaha kirada Baabuurta.

ISAGOO HIGELIYEY: Go'aankii Guddiga Siyaasadda ee X.H.K.S. iyo Golaha Wasiirada.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

In Kirada Baabuurta tankiisu ka badan yahay 10ka tan ee Xamuulka kala duwan qaada (General lago) marka uu marayo waddada aan laamiga aheyn (waddo xun) ay noqoto 40 senti tan Km. kiiba, marka uu waddo laami ah marayana ay noqoto 35 senti tan km. kiiba.

Qodobka 2aad

Waddada qeybina xun tahay qeybina laami tahay, waddo xun oo aan laami aheyn ayaa loo xisaabi doona, haddii qeybta laamiga ahi ay gaadho ama ka yar tahay saddex dalooIkiiba dalool.

Haddiise saddex daloolkiiba dalool ay ka badan tahay laamigu, qeybta laamiga ahna waxaa lagu qaadi doonaa 35 senti, qeybta xuna waxaa lagu qaadi doonaa 40 senti tan Km. kiiba.

Qodobka 3aad

Baabuurta tankoodu u dhexeeyo 6-10 tan ee Xamuulka kala duwan qaada kiradoodu waxey noqon doontaa 40 senti tan km. kiiba wadda kasta ay marayaanba.

Qodobka 4aad

Jidadka ay dhibaatadoodu xad dhaafka tahay, haddii ay lagama maarmaan noqoto, waxaa go'aan gaar ah kala gaari kara Wasaaradda Gaadiidka Dulka iyo Cirka ka dib marka ay soo qorato Hay'adda arrintu khuseeyso.

Qodobka 5aad

Baabuurta la Kireysto ee madhnaanta loogu diro meesha xamuulka yaal, meeshaas oo ka baxsan xadka magaalada ama tuulda laga dirayo, kharajka saliida lagu gaadhayo halka kiradu taal waxaa bixin doona cidda baabuurka kireysaneysa.

Qodobka 6aad

Baabuurta ay u baahdaan shirkadaha qalaad ee dalka Soomaaliyeed ka shaqeysta (Shirkadaha Macdanta, Jidadka, Gegooyinka Dayuuradha iyo Dekedda kirada ay wax ku qaadanayaan waxaa laga gaari karaa go'aan khaas ah.

Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka waxey awood u leedahay in ay amar gaar ah ka soo saarto oo xadidayo Krada Baabuurta qodobkan ku tilmaaman.

Qodobka 7aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 23.8.79, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Qodobka 8aad

Waxaa la baa'biyey xeer kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la xeeen karin Xeerkan.

Mudisho 23 Agoosto 1979

Wasiirka Gaadiidka Dhulka iyo Cirka
Dr. Keenidiid Axmed Yuusuf

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre
Madaxweynaha J.D.S.

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 49 ee 22 Sebtember 79, soo saarid Lacag dahab ah, Qalin ah, iya maar (cupronickel) loogu tala galay xuska sannadguurada 10aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qodobada 82aad, 111aad, 113aad, ee Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 5aad ee Xeerka Lr. 2 oo soo baxay 26kii Maarso 1961 loona beddelay Sharciga Lr. 13 oo soo baxay 23kii Maajo 1961, kuna saabsan nidaamka lacagta Soomaaliyeed;

MARKUU ARKAY: Qodobka 1aad ee Xeerka Lr. 2 ee 16kii Febaraayo 1966;

ASAGOO TIXGELINAYA: Baahida loo qabo in la soo saaro lacag dahab ah, qalin ah iyo maar ah, looguna tala gelayo xuska sannadguurada 10aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969 iyo in la caddeeyo tilmaamaha xagga farsamada iyo farshxanka;

ASAGOO TIXGELINAYA: Talada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Guddoomiyaha Bangiga Dhexe ee Soomaaliya;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa loo oggolaaday Bangiga Dhexe ee Soomaaliya inuu soo saaro lacag kala ah: Dahab, Qalin, iyo Maar (Cupro-Nickel) oo loogu talagalayo xuska sannadguurada 10aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969; qiime wajiyeedkooduna yahay: Dahab Sh.So. 1.500 Qalin Sh.So. 10. iyo Maar Sh. So. 10

Qodobka 2aad

Tilmaamaha Farsamada ay yeelan doonaan lacagahaasi waa sida hoos ku xusan:

Qiimaha Sh.So.	Ballaca mm.	Macdanta o/oo		Dhimana-shada finimada loo ogol yahay o/oo	Miisaanka saa esan Gr.	Dhimana sharciye-shada miisaan ka loo oggol o/oo o/oo	G.
1.500	28,4	Dahab:	916,6	1	15.98	15	Girgirro
		Maar :	83'3				
10	38,61	Qalin:	925	2	28.28	50	Girgirro
		Maar :	75	10			
10	38,61	Cupro:	75	=	28.28	=	Girgirro
		Nickel:	25	=		=	Girgirro

Qodobka 3aad

Tilmaamaha Farshaxanka ay yeelan doonaan lacagahaasi waa sida hoos ku qoran:

WEJIGA: Lacagtoo idil waxaa ku yaal Astaanta Dawladda Soomaaliyeed; xagga sarena waxaa ku qoran erayga «JAMHUURIYADDA DIMOQARAADIGA SOOMAALIYA» oo ku qoran af Soomaali iyo Carabi; xagga hoosna waxaa ku qoran ereyga SANNADGUURADA 10AAD EE KACAANKA» oo ku qoran Af Soomaali iyo Carabi, astaanta Dawladda hoosteedana waxaa ku qoran taariikhda 1969-1979, Af Soomaali iyo Carabi.

DHABARKA: Lacagtoo idil xagga sare oo ku aadka masawir walba waxaa ku qoran qiimaha lacagta iyo ereyga «Shilin» Af Soomaali iyo Carabi.

MASAWIRKA 1aad: Wuxuu muujinayaa tallaabada laga qaaday cuntada degdegga ah, waxaana ka muuqda Xoghayaha Guud ee X.H.K.S. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga ee Soomaaliya oo ku wata gacanta midig saxan raashin ku jiro, gacanta bidixna wuxuu ku wataa koob caano ah; gadaashiisana waxaa ka muuqda wiil iyo gabar iyaguna cunto sita.

MASAWIRKA 2aad: Wuxuu muujinayaa Ololaha Horumarinta Reer Miyiga, waxaana ka muuqda gabar ardo ah oo wax tusaalyenaysa oday reer miyi ah.

MASAWIRKA 3aad: Wuxuu muujinayaa dejinta dadka abaaruhu waxyeeleeyeen, waxaana ka muuqda wiil yar, gabar iyo Hooyadeed oo fadhiya toombuug hortii.

MASAWIRKA 4aad: Wuxuu muujinayaa horumarka laga gaaray Tacliinta, waxaana ka muuqda daaraha Jaamacadda Gahcyr; arday wax ku eegaya diirad iyo gabar wax qoreysa

MASAWIRKA 5aad: Wuxuu muujinayaa hiddaha iyo dhaqanka Soomaalida, waxaana ka muuqda koox cayaartooy ah oo dheeleysa, nin iyaga ka mid ahina durbaan u tumayo.

Qodobka 4aad

Tirada ugu badan oo la soo saari karo iyo midwalba qiimo wajiyeedkeeda waa sida hoos ku qoran:

Qiimo wejiyeed	Tiro	Macdanta	Qiimaha Guud
Shs.So.			
1.500.=	5.000	Dahab	7.500.000./=
10.=	25.000	Qalin	250.000.=
10.=	100.000	Maar	1.000.000.=

Qodobka 5aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu soo qoro Baafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga ee Soomaaliya.

Muqdisho 22 Sebtember 1979

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)
Madaxweynaha J.D.S.

MAXKAMADDA GOBALKA MUDUG

Tirsi/MGM/82/4/79 Tr. 4.4.79

QARAAR MAXKAMADEED

GUDDOMIYAHA MAXKAMADAN

HADDUU ARKAY: Arjigii uu soo qortay Cali Nuur Xalane Kaahiye degan Gaalkacyo, taariikh. tahay 29.3.79 iyo Xaashida Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Gaalkacyo, taariikh. tahay 31.8.79.

HADDAY ARAGTAY: qod. 69 D.L. 9/9/65 N.2 waxaa cadaatay in jeega wareega lam. yahay 206570 lacagta ku qorani tahay 2.500/=shilin ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Gaalkacyo.

WAXAAN AMRAYAA

In loo cubooneysiiyo mar labaad Jeegga kor ku xusan muddo 15be ri gudahood ah oo ka bilaabata marka lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah haddaan la helin cid sheegata waana in gacanta laga saaro Jaalha Magaciisu kor ku qoran yahay ama qof sita wakaalad sharci ah ayadoo la sugaayo 15 beri.

K/S Guddoomiyaha Maxkamadda G. Mudug
(Cabdullaahi Hilawle Cali

L. 494

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA

HADDUU AKHRIYEY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Jeegga dhumay oo lambarkiisu ahaa 015107 agana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna qorneyd lacag dhan Shs. So.31.115 /= uu iska lahaa Xaaji Cab. Daahir Sh. Cu. sida ku cad warqadda lam. 7066, taariikh. 29.9.79 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 5aad.

HADDUU ARKAY: qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9/9/65.

WUXUU XEERIYEY:

In laa baabiyo (ammortamento) Jeegga wareega lam. 015107, oo ku qoran Magaca Xaaji cabdulqaadir Sh. Cu. ayna ku jirto Shs. So. 31.115/=

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 3aad u beddelo Xaaji Cabdulqaadir Sheekh Cumar Jeegga wareega ee ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markey ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maalmood, maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 29.9.79,

Gudoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir
Dr. Khaliif Xirsi Cali

L. 495

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA

HADDUU AKHRIYEY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Buug Keydka dhumay oo lambarkiisu ahaa 1718. lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 3aad kuna qorneyd lacag dhan Shs. So. 4.000/= uu iska lahaa Cabdi Muudey Maalin sida ku cad warqadda lam. 1544. taariikh. 30.9.79 oo Bangiga Ganacsiga iya Keydka Soomaaliyeed laanta 5aad.

HADDUU ARKAY: od. 69 sharciga lam. 2 ee 9/9/65.

WUXUU XEERIYEY:

In la baabi'iyo (ammartamento) (buugga dhigashada), lam. 1718. oo ku qoran magaca Cabdi Muudey Maalin ayna ku jirto Shs. So. 4000/=

WUXUU FASAXAY

In bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 3aad u beddelo Cabdi Muudey Maalin buugga Keydka, ee ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ahka dib markay ka soo wareegato mudo aan ka yareyn 30 maalmood, maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliyeed, haddii aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho 30.9.79.

Gudoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir
Dr. Khaliif Xirsi Cali

L. 496

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDU

MARKUU AKHRIYEY: Arjiga taariikhdiisu tahay 19.9.79, oo uu soo qortay Jaalle Cabdulqaadir Maxumud Yare oo ku weydiistay in loo cusbooneysiiyo Jeegga wareega ee Lam. yahay 187386 taariikh 23.8.78 Shs. So. 50.000 (kontonkun) oo isaga ka dhumay.

MARKUU ARKAY: Xaashida lam. laheyn taariikh 28.8.79 oo Bangiga Ganacsiga Ummadda Laanta Burco uu ku soo caddeeyey in Jeegga L. yahay 187386, T. 23.8.79, Shs. So. 50.000. laga sameeyey Bangiga Ganacsiga Ummadda ee Burco, laguna sameeyey magaca Cabdulqaadir Muxumud Yare

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 Xeerka soo baxay 9kii Sebtembare 1965. N.2 Leege sul credito e ai titoli)

WUXUU AMRAYAA

In Bangiga Ganacsiga Ummadda Laanta Burco ay u cusbooneysiiyo Jaalle Cabdulqaadir Muxumud Yare Jeegga dhumay ee lambarkiisu ahaa taariikh. 23.8.79 Shs.So. 50.000/= lacagtiisana la siiyo Jeeglaha 15 maalmood ka dib marka Dekereetada lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya haddii inta ka horreysa mudadaasi uusan ka kiinin kii heystay jeegii dhumay cabasho qoraaal ah.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga Ummadda ee Laanta Burco in uu ku dhejiyo Naqallada Dekereetadan irdaha Bangiga iyo meelaha u furan dadweynaha si ciddii dan ka lihi halkaas uga eegato Maadadan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer
(Dr. Maxamed Xirsi Ismaaciil)

Kaaliyaha Makamadda G. Togdheer Burco
(Maxamed Axmed Naaleela)

L. 497

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA

HADDUU AKHRIYEY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Jeegga Wareega dhumay oo lam-

barkiisu ahaa 017063, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad kuna qornayd lacag dhan Shs.So. 25.000/= uu iska lahaa Xaaji Daa'uud Warsame sida ku cad Warqadda lam. 7255 taariikh. 3.10.79 oo Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 5aad

HADDUU ARKAY: qod. 69 sharciga lam. 2 9/9/65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortemento) Jeega wareega lam. 017063 oo ku qoran magaca Xaaji Warsame Daa'uud eyna ku jirto Sh. So. 25.000

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laant a 1aad u beddelo Xaaji Daa'uud Warsame Jeega wareega ee ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay soo wareegato muddo aan ka yareyn! 15 maalmood, maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho 4 10 79.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir
Dr. Khaliif Xirse Cali

L. 498

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA

HADDUU AKHRIYEY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Jeeg wareega dhumay oo lambar-

kiisu ahaa 258241, lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta B/ dheere kuna qornayd lacag dhan Shs. So. 10.000 uu iska lahaa Cali Xaaji Maxamed N. sida ku cad warqadda lam. 011594 taariikh 9.10.79 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 5aad

HADDUU ARKAY: qod. 69 sharciga lam. 2 9/9/65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeega wareega lambar 258241. oo ku qoran magaca Cali Xaaji Maxamed N. ayna ku jirto Shs.So. 10.000/=

WUXUU FASAXAY

In bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta B/ dheere u beddelo Cali Xaaji Mxamed Nuur Jeega wareega ee ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maalmood, maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdsho 9 10 79

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir
Dr. Khaliif Xirse Cali

L. 499

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY: dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Jeega wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 172656-035157. lagan soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta xarunta kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 50,000/= iyo 4865/= u iska laahaa Cabdi Xuseen Nuur sida ku cad warqadda lam. 028112. taariikh. 11.10.79 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laan ta 5aad.

HADDUU ARKAY: qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9/9/65

WUXUU XEERIYEY

In la baabiyo (ammortamento) labada Jeeg war. lam. 172656-035157; oo ku qoran magaca Cabdi Xuseen Nuur ayna ku jirto Shs. 50.000/= iyo 04865/=

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Laanta xarunta u beddelo Cabdi Xuseen Nuur labada Jeeg war. ee ku tilmaaman una sameeyso kuwa la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maalmood, maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho 11 10 1979

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 500/=

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADDIR

GUDDOOMIYAHA

HADDUU AKHRIYEY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Jeeg wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 031470. lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qornayd lacag dhan Shs. So. 20.000/= u iska lahaa Dalal Faarax Axmed sida ku cad warqadda lam. 028143 taariikh 13.10.79 oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 5aad.

HADDUU ARKAY: qod. 69 sharciga lam 2 ee 9/9/65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabiyo (ammortamento) Jeeg wareega lam. 031470 oo ku qoran magaca Dalal Faarax Axmed ayna ku jirto Shs. So. 20.000

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Xarunta u beddelo Dalal Faarax Axmed Jeeg wareega ee ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato mudo aan ka yareyn 15 maalmood, maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho 14 10 79

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax-

L. 501